

**Ujeedo:** Cusbooneysii Macluumaadkaaga Lagaala Soo Xiriirayo Xaaladaha Degdeg ah

Qoysaska Qaaliga ah ee MESD,

Nabadgelyada iyo badqabka ardaygaagu waxay noo tahay mudnaanta koowaad. Waqtiyada ay timaado xaalada degdega ahi ama baahi degdeg, in la hayo macluumaadka sax ah oo cusub ee lagaala soo xiriirayo waa muhiim in la hubiyo inaan degdeg uga jawaabno sida ugu haboon.

Waxaan fahamsanahay in la bixiyo macluumaadkani qoysaska qaarkood inay tahay dareen xaasaasi ah, laakiin waa tallaabo muhiim ah oo lagu ilaalinay laguna taageerayo ardaygaaga.

Waxaan dhammaan qoysaska weydiisaneynaa inay dib u eegis ku sameeyo oo ay cusbooneysiyaan macluumaadka lagaala soo xiriirayo xaaladaha degdeg ah kuwaasi oo nidaamka dugsiyada ku jira. Tani waxay noo oggolaaneysaa inaan:

- Si degdeg ah kuula soo xidhiidho haddii ay timaado xaalad degdeg ah oo khuseysa ardaygaaga.
- Aan wargalino cida kale ee aad na siisay in lala xidhiidho marka adiga aan lagu heli karin.
- Inaan kula socodsiino arrimaha cusub ee ku saabsan dugsiga, ee ay ka mid yihiin dib u dhaca ku yimaado dugsiga, xidhitaanka, ama marka ardayga hore loo sii deynayo.

**Maxay tani muhiim u tahay:**

Waxaa jira xaalado fara badan marka dugsiyadu ay ku tiirsan yihiin macluumaadka lagaala soo xidhiidho xaaladaha degdega ah, oo ay ka mid yihiin:

- Xaaladaha ay ka mid yihiin badqabka ardayga.
- xaaladaha degdeg ah ee dugsiga.
- Dhaqangalinta Arrimaha Laanta Socdaalka ama Xabsi Ku Haynta.

Qoysaska leh daryeelbixiyaasha aan sharciga lahayn, waxaa muhiim in cinwaan lagaala soo xiriiro gaar ahaan marka xalaad degdeg ahayd jirto. Haddii daryeelbixiyaha la xiro inta ay ardaydu ku jirto dugsiga, waxaa noqon doono qof labaad ee aan la xiriirayno qofka liista ugu diiwaangashan marka ay timaado xaalad degdeg ah iyada oo aan hubineyno inuu daryeelo ilmahaaga.

Tallaabadani waxay kaa caawineysaa in ayna caruurta waajihin xaalad hubanti la'aan ah ama aan la geyn meelaha caruurta lagu daryeelo sababtoo ah ma jirto cid ka mas'uul ah oo kale.

**Agabayada Lagugu Caawinayo:**

Waxaan ku siiney [Kaarka Macluumaadka Xaalada Degdega Lagaala Soo Xiriirayo](#) si uu kaaga caawiyo inta nidaamka lagu jiro lagu cusbooneysiinayo macluumaadkaaga.

Waxaan kaaga mahadcelineynaa waqtiga aad na siisay si aanu hubino macluumaadka waqtiga ee muhiimka ah. Haddii aad hayso wax su'aalo ah ama aad gargaar u baahan tahay, fadlan ka baaqsan inaad nala soo xiriirto.

Daryeel iyo Dadaal,

[Your Name]

[School Name]